XISAAB

XISAAB

Tilmaame Bare

Fasalka 4aad

Tilmaame Bare

Fasalka 4aad

Dhibcaha Xisaabta iyo Ingiriisiga ee ardayda

JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

MOE

JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 33.35

XISAAB

TILMAAME BARE

FASALKA 4[aad]

Qoraha

Daa'ud Aadam Cabdulaahi

Qiimeeyayaal

Axmed Saalax Nuur

Axmed Yuusuf Nuur

Sayid Cismaan Caateeye

Buugga waxa la daabacay 2002 E.C, Dajinta iyo soo saaridda buuggan waxa fuliyay wasaarada waxbarashada ee jumhuriyada Dimoqraadiga Fedaraalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qoodista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

Wasaaradda waxbarashadu waxay u mahad naqaysaa shakhsiyaadka iyo kooxaha si toos ah iyo si dadban uga qayb galay daabicista iyo soo bixitaanka buuggan.

Kuwa haysta ogolaashaha qoraalka lookiin lagu eedeeyo inay gaf ka galeen xuquuqda buugga. Waa in ay la xidhiidhaan xafiis waynaha wasaaradda Waxbarashada ee ku taala Arata kiilo. Adiss Ababa Itoobiya.

Tusmada Buugga

CUTUBKA **1** TIROOYINKA IDIL ILAA 1,000,000

HORDHAC

Nolol maalmeedka deegaankeena waxyaabaha aynu ku aragno oo dhan waxaan garannaa inagoo u is ticmaalayna tirooyinka idil. Tusaale ahaan lugaha iyo gacmakeena, tirada ilkaheena, tirada guud ee qoyska, da'deena, miisaankeena, agaagaarka ama magaladeena dadka ku nool tiradooda, qiimaha iyo culayska sarciga kujira jawaanada (kuuntaal), sar ciga kuuntaal ahaan ku rasaysan bakharada, Barkadaha lagu kaydiyo biyaha qiyaastooda, gurigeena iyo dugsiga fogaanta u dhaxaysa ---- I.w.m waxyaabahaas oo dhan waxaynu ku tilmaana tirooyin.

Sidaa daraadeed tirooyinka oo labartaa siwanaagsan ayay inoo anfacaysaa ugarashada deegaankeena. Haddaba cutubkan tirooyinkaillaa 10,000 inagoo sookoobaynaa ayaa 1000; 10,000; iyo 100,000 wadartooda raadinaynaa ilaa 1,000,000 tirooyinka ah loo akhriyo, loo qoro islamarkana latartansiinayo siday ukala horreeyaana loo dhigaa. Tirooyinka 6-da god ah ee tirooyinka idil iyo ku muujinta Qiimo-rugeedka. Iyo raadinta qiyaasta qiimaha ugu dhaw.

Ujeedooyinka guud ee Cutubka

Cutubkani markuu dhammaado kadib, ardaydu waxay awood u yeelan doonaan

- Akhrinta, Qoridda, isbarbardhiga iyo Horsonaanta tirooyinka idil ilaa 10,000

- Akhrinta iyo Qorridda dhufsanayaasha 1000; 10,000, iyo 100,000 ilaa 1,000,000.

- Akhrinta iyo Qoridda tirooyinka idil ilaa 1,000,000

- Muujinta Qiimo-rugeedka tirooyinka 6-god ah.

- Isbarbar dhigidda iyo Horsanaanta tirooyinka idil illa 1,000,000

- Qoridda qiimaha ugu dhow tirooyinka, iyaga oo tirooyinkaas u soo gaabinaya (usoo riixaya) tobanaadyada, boqolaadyada, kunaadyada, toban-kunnaadyada iyo boqol kunnaadka ugu dhaw.

1.1 NAKHTIINKA TIROOYINKA IDIL ILAA 10,000

Casharkan markay ardaydu dhamaystaan waxay awoodayaam (awoodi karaan)

- *Akhrinta tirooyinka idil ilaa 10,000*

- *Qoridda tirooyinka idil ilaa 10,000*

- *Isbarbar dhigidda iyo horsanaanta tirooyinka idil ilaa 10,00*

1.1.1 Akhrinta Iyo Qoridda Tirooyinka Idil Ilaa 10,000

Diyaarinta Habka Baris barasho

Marka casharka la billabayo waa in la xasuusiyaa in tirooyinka idil ee ilaa 10,000 kusoo barteen fasalkii saddexaad. Sida ku xusan buugga ardayga hawlgalka 1.1 A lagu hawlgaliyaa inay buuggooda qoraalka ah ku guuriyaan kadib si koox koox ah u falamqeeyaan sida tusaalaha laga siiyey astiro ahaan ama qoraal ahaan ugu qoran buugga waa in markaa ay isla doon doontaan laba qaab. Shaqadan isku aadaadinta ah waa in aad dulwareegtaa ardayda adigoo ogaanaya inay si sax ah isugu aadinayaan.

Kadib markay ardayda koox-koox ahaan uga shaqeeyeen isku aadinta astirooyinka iyo xarfaha tirooyinka si aad ugu xaqiijiso waxaa habboon inaad tusto jaantus tilmaamaya astirooyinka iyo xarfaha tirooyinka fallaadha udhaxaysa labokasta oo isku mid ah oo loogu tala galay siloogu kaabo barashadan casharkan. Hadduu jirin waa in sabuurada loogu qoraa isku aadinta astirooyinka iyo xarfaha tirooyinka ama weedh-xisaabeedyo.

Hawgalka fasalka lambarka 2^{aad} sida ku qoran tiro idil 1235 iyagoo adeegsanaya goobooyinka ku ag sawiran lagu dhiiri galiyaa sidii ay u akhriyi lahaayeen. Waa in sabuurada loogu qoraa tirooyinka idil sida dhufsanayaasha10,100 iyo 1000 labadaba astiro ahaan iyo xarfo ahaan si ardyda loo ogaado inay awoodeen dhufsanayaashan ilaa 10,000 awoodooda akhris iyo qoraalba.

Akhriska tirooyinkan waxaa loo adeegsan kaabayaal kala duwan sida silig, qoryo iyo furarka qaruuradaha silo adeegsado abaakas waa in silig la dhigaa rug kasta xagiisa dambe la dhigaa sagaal, sagaal xabo oo furar ah.

Kadib furarka loo baahado kolba halka hore lasoo mariyaa. Furka halkiisa aanu ka xigin silig waxa uu lamid yahay o (eber).

Si ardayga loo tuso isticmaalka abaakaska ee ku xusan buugga ardayga hawlgalka 1.1.A lambarka 2 1235 siliga rugta koobaad waxaa dul yaala 5 fur, siliga rugta tobnaadk ahina 3 fur, rugta boqolaadka na 2 fur iyo rugta kunaad oo ah 1 fur isla marka furarka oo lasoo marinayo halka danbe iyagoo ardayda eegayaan la fahan siiyaa-kun lababoqol, soddon iyo shan in akhniskoodu yahay kadib tirada furarka ay ardydu u kala bad badelaan god kasta si ay u bar bartaan akhriska dhufsanayaasha barbarashada kadib ardaydu waa in silig kasta tirada furar ka ku yaala kala badbadelaan ilaa 10,000 kadibna akhriyaan.

Hawlgalka soo socda sida ku qoran sabuurada ee qoraalka astirooyiinka ama abaakaska waxay ku arkeen waa in marka hore astiro ahaan kadibna qoraal tirooyinka ee xarfaha ah buuggooda ku guuriyaan. Qoraalka tirooyinka ee xarfaha ku muujiyaan astiroahaan ardyda inta ay laba laba u wada shaqeeyaan iyagoo uu mid astiro ahaan kuqoraa kadib ardayga kale u badelaa xarfo ahaan isla markaa ardayda kalena laga qayb galiyaa-si ay u bar bartaan qaababka kala duwan.

Awoodda la Saaro Ardyda Rabitaan ka Gaarka ah Leh

Waa munaasab in awoodda la saaro rabitaanka gaarka ah ee ardyda. Ardayda fahankoodu daahaa waa in marka hore loogu bilaabaa tiro laba astiro leh, marka xigta tiro leh saddex astiro (god) ee tirooyinka idil si ay u akhriyaan una qoraan wakhti in lasiiyo si ay u fahmaan hadba sida degdegoodu yahay ugu bartaan. Dhinaca kuwa (ardayda) fahankoodu deg dega yahay waa in aanan lagu joojin tirooyinka idil ee ilaa 10,000 hadba ay u fahamayaa astirooyinka loogu kordhiyaa waa inaad siisaa markaa caawimo ah sidii ay ugu baran lahaayeen kartidooda deg dega ah.

Qiimayn Joogta Ah

Habka waxbarista ardayda sida fasalka ay ku arkeen tirooyinka idil si loo ogaado inay akhrin iyo qori karaan waa in meelaha khaladaad ku kajiro lakor meero dabadeedna lasaxo iyadoo ay jirto (socoto) hawlgallada sixida ardayda. kadib xilliga dhammaadka casharka loo' Soo gunaanaday arday kala duwan si nasiib ah su'aalo sidan ah lawaydiiyaa tusaale ahaan 4386 akhrinteeda iyo qoraalkeeda labada qaab ku qoraan Astiro ahaan iyo xarfa ahaan. Iyadoo inta kale lagu ogaanayo inay iyaguna fahmeen. Gabagabada casharka waa inaad kusoo gabo gabeeysaa su'aalaha ku qoran **Laylis** ka 1.1A adigoo usiinay a shaqo guri.

Jawaabaha Layliska 1.1B

1.   t.   Laba boqol soddon iyo afar

      j.   kun laba boqqol soddon iyo afar

      x.   saddex kun sagaal boqol afartan iyo shan

      kh.   toddoba kun shan boqol iyo siddeetan

      d.   Sagaal kun toddobo boqol iyo lix

      r.   siddeed kun iyo sagaal iyo labaatan

      s.   lix kun iyo hal

      sh.   afar kun

2.   t. 2000   d. 9788

     j. 8536   r. 3502

     x.   10,000   s. 9788

     kh. 7320

1.1.2 Isbarbardhigidda Tirooyinka Idil Ilaa 10,000

Habka ugu billaabsita iyo ugu hormarinta casharka

Fasalka gudihiisa arday gaadhaysa tiradooda 3-5 (saddex illaa shan arday) oo isugu jira lab iyo dhaddig iyagoo dhererkooduna kala duduwan yahay Soo istaaji sabuurada agteeda. Gabadh ardayad ah intay Soo kacdo ardaydan taagan saf galisaa iyadoo ka billaabaysa ardayga ugu gaaban. Arday (will ah) kale ayaa isaguna soo joojin ardayda isaga oo ka bilaabay ardayga dheer labadan saf inay sax san yihiin ardayda kale ha xaqiijiyaan.

Kaabayaal waxbarasho sida geesaha xoolaha oo dhererkooda kala duwan yahay oo loo diyaariyay isbarbardhiggid waa la adeegsan karaa.

Habkaloo dheeraad ah ayaa la adeegsan karaa. Sabuuradda ayaad ugu qoraysaa xariiqo dhowr ah oo kala gaagaaban ayaad ardayda faraysaa in ay isbarbardhigaan iyagoo ka bilaabayo xariiqa ugu gaaban islamarkaana ardaydu qiiyaastaan midba midkakale sida uuga gaaban yahay. Haddii baakidho loogu qoro xariiqo kala duwan dabadeedna isubarbardhigan horsanaanta xariiqaha waxay kobcinaysaa malaynta ama wax qiyaasidda.

Markaad ku hawlgalisay hawlgaladan kadib in ardaydu ay ku soo barteen fasalka saddexxaad isbarbardhigga tirooyinka idil adigoo xasuusinaya ayaad u sharaxaysaa wakhtigan inay isbarbardhigaan tirooyinka godadka badan leh iyagoo koox ahaan uga wada shaqaynaya.

Buugga ardayga hawlgalka 1.1. kaga shaqeeyaan fasalka sida hawlgalkan fasalka ka muuqata.

Tirooyinka lammaanaha ah ee **B**, tirooyinka lammaana ah ee kuyaal **T** iyo saddexda tiro ee kala duwan ee ku taala **J**. waa in markaa ardydu miisaskooda iyagoo isla kaashanaya isbarbardhigaan si ay uga shaqeeyaan su'aalaha. Ardaydu waxay hawlgaladaas ama shaqadaas isbarbardhiga ah qabanayaan kahor intaynan uguuda galin (gudbin) tirooyinkan idil ee soo socda ee ah qaababka isbarbardhigida tirooyinka idil.

B. Hadba sida habboon isbarbardhigida tirooyinka leh godad kala duwan, tirooyin ka idil godadkooda kala duwan ama godadkoodu isle'eg yihiin ee ku qoran **tusaale** 1 inta loogu qoro baakidho si shaqsi shaqsi ah iyo si koox koox ah ay ardaydu tartansiiyaan. Si aad u garato inay kala sooci (saari) karaan tirada wayn ama tirada yar. Heerkan calaamadaha la adeegsanayo isbarbadhigida tirooyinka idil **< (kayar)** adigoo u dhex galinaya tusaalooyin.

Tirooyinka Lammaanaha ah ee Godadka Kala Duwan Leh

- Tirooyinka lammaanaha ah ee leh laba god iyo saddex god.
- Tirooyinka lammaanaha ah ee leh saddex god iyo afar god.

Si aad u xajiso in ardaydu karti uyeesheen isbarbardhigga tirooyinkan waa in ay ardydu isbarbardhigaan tirooyinka lammaanaha ah ee godad kala duwan iyo kuwa isku godadka ah oo ha kutusaan dabadeedna ha akhriyaan. Waa inaad hubisaa in ardaydu ay fahmeen in tirada godad badan lehi ay tahay tirada weyn.

T. isbarbardhiga tirooyinka idil ee leh godad isle'eg si habkan looga shaqeeyo buugga ardayga **tusaale 2** sida ka muuqata lammaanayaal wata godad badan oo isle'eg oo tirooyinka idil la isbarbardhigo balse intaan laka la saarin tirada gododkoodu labo kuwa ah tusaale ahaan 43 iyo 34 ha isbarbardhigaan iyagoo ka bilaabaya tirada godka wayn leh sida 43 > 34 ayaa ardayda looga baahan yahay.

Sidan si lamid ah tirooyinka idil ee lammaan godod kooduna yahay 3 god tusaale 549 iyo 630 ayey sax ku tahay. Maxaa yeelay 5 < 6 (lix ay ka wayn tahay shan) si ay u gartaan. Sida ku qoran buugga ardayga tirooyinka afarta god leh (7654 iyo 7645) ee lammaan waa in aad ku xaqiijisaa inay si wanaagsan u fahmeen iyagoo qaabka isbarbardhigida adeegsanaya ka shaqeeyaan (7654 iyo 7645).

Tirooyinka leh godadka isku midka ah ee lammaan si la isubarbardhigo waa in laga billaabaa godka ugu tirada wayn si isla isubarbardhigo isu eegidda godka wayn hadday tirada kale godkeeda tirada hore le'egyahay waa la wadayaa ilaa godka ay kukala yar yihiin laga gaadhayo. Isubarbardhiga godadka marka la garto godka ay ku kala waynaadeen ayaa la odhan karaa tiradan ayaa wayn.

Intaa waxaa dheer godad isku mid ah tirooyinka lamman ee wata tusaale ahaan 8078 iyo 8478 inta aad ku qorto sabuurada adigoo kabilaabaya godka ay kukala waynaadeen 8078 < 8478 ayaa run soobaxaysa. Kusoo dhawee ardayda markaa iyagoo iska kaashanaya ama kuwa ka doodaya caddayn sedan ah dhiibaan. Dooda, fakir isdhaafsiga iyo iskaa kaashiga ardayda adigoo kormeeraya ama indha indhaynaya xogna ka ururinaya jawaaba waad ka siin karta in taa kadib hawlgal fasal oo kale ayaad siinaysaa si ay u barbartaan.

Culayska oo Lasaaro Ardayda u Baahan Qaabab Kale

Maadaama ay jiraan kala duwanaansha xagga fahanka ardayda. Ardayda ka hoosaysa kuwa fahanka dheexe leh waa inaad uga billowdaa isugaynta tirada godka kaliya ah ee lammaan markaad ogaato inay barteen tiradan godka kaliya ah kadib ugu god kale si ay isbarbardhigyada kala duwan u bartaan fursado waa inaad siisaa adigoo u sheegaya inay ka bilaabaan godka wayn si u gartaan godka ay ku kala wayn yihiin ee hadba xiga xaga hore yahay godka lagu ogaanayo tirada wayn.

Dhinaca kale ardayda kale ee fahankoodu sarreeyo tirooyinka lammaan waa inaad ugu dartaa hal si ay badnida tirada tiradu aad ugu kobcisaa hawlgalkooda isbarbardhigida ah wakhtiga (qaabkan) shaqada ay qabanayaan inay ka caajisaan ama la yimaadaan dabee cado edeb daro ah si ayna u iman awooda saartaa si degena aad uga fiirsataa.

Qiimaynta Joogtada Ah

Wakhtiga cashar bixin habkay ardaydu u qaadanayaan dareenka aad ka qaadataa waxaad ku ogaanaysaa su'aalaha ay ardaydu kuwaydiinayaan markaad uga jawaabayso sida ay ardaydu ugu dhiiran yihiin iyo indhaindhyanta ama kormeerida fasalka ardyda isbedelkooda dadaaleed sii xoojinay a ayaad usoo gunaanadaysaa. Si ay u dhamaystirtaan casharkooda tirooyinkanlammaane ama tirooyinkan laba labada ah ee soo socda si ay isubarbardhigaan

    b.   1,000,000 iyo 787,000

    t.   962,599 iyo 962,600

Si ardydu ay u gaadhaan hadafka waa in markay tirinayaan tirada tirooyinka ku jira godad ka ay jiraan ebero kahorreeya islamarkaasna ay u adeegsandaam isbarbardhigga tusaale ahaan 005.00026 iyo 00,365. Casharka waxaa lagu soo gabagabaynayaa su'aahaha B ee layliska 1.1 adiga oo u siinaya shaqo guri

Jawaabaha Layliska 1.1T

b.	$250 > 205$	s.	$9999 > 8999$
t.	$856 < 865$	sh.	$8880 > 7881$
j.	$2000 < 2002$	dh.	$4444 < 6666$
x.	$5005 < 6500$	c.	$7335 + 7335$
kh.	$7800 < 8700$	g.	$9999 < 10,000$
d.	$5555 < 6000$		
r.	$9242 = 9242$		

1.1.3 Isbarbardhiga iyo Horsanaanta Tirooyinka Idil Ilaa 10,000

Habka ugu billaabida

Waxaa loogu billaabayaa casharkan iyadoo isbarbardhigida iyo horsanaanta tirooyinka idil ee ay ku barteen casharkii hore bugga baraha 1.1.2 adigoo usoo koobaya ayaad kana ubilaabaysaa.

Hawlgalka soo socda ee buugga ardayga bogga ku xusan saddex dugsi ardayda dhigata tiradoodu tahay 9545; 900 iyo 9500 ha uga shaqeeyaan iyagoo tirooyinka lammaane lammaane usamaynaya si ay isu barbardhigaan tirooyinka islamarkaana meelaha loo baneeyay ee banaan astaamaha $<$ ama $>$ ha isticamalaan si ay weedha u saxaan, su'aalaha ah sababta? Si ay uga bixiin karaan faahfaahin dheeraad ah.

     A. 900 --------------------- 9545 waa maxay sababtu?

     B. 900 --------------------- 9500 waa maxay sabatu?

     C. 9545 ------------------- 9500 waa maxay sabatu?

Sida kor ku qoran tusaalayaasha A iyo B faahfaahintooda waa maadaama tirooyinka idil godakoodu kala badan yihiin sida 900 waa saddex god oo kaliya mar walba tirada godadkoodu badan yahay umbaa mar walba tirada godadkeedu badan yahay umbaa wayn. Sida tirooyinka lammaane ee ku qoran C ay yihiin kuwa godka kunaadka iyo Godka boqobadka ah ay isle'eg yihiin waxay ku kala duwan yihiiun godka tobnaadka ah ee $4 > 0$. Ayaan ardayda looga baahan yahay inay sidaa ufaahfaahiyaan.

Waxaad ardayda ku howlgalisaa in tirada ardayda ee dugsiyada kala duwan astaamahan iyagoo u adeegsanaya tirada wayn, kuwa isle'eg iyo tirada yarba astaamaha $<$, $>$ ama $=$.

     900 __<__ 9500 __<__ 9545 ama

     9545 __<__ 9500 __<__ 900

Haddaba waxaa lafilayaa in ay ardaydu si dhib yar u isticmaali karaan astaamahan isbarbardhigida tirooyinka iyo horsanaanta tirooyinka oo kaliya caddayn buuxda ma noqon karto.

Su'aasha ah dugsigee ayaa ugu yar ardaydu waxay odhanayaan dugsiga ugu godka yar waa **B**.

Dugsigee ayaa isna ah dugsiga ugu tiro wayn waa dugsiga **A**. ayaa ardayda looga baahan yahay jawaabo noocaas ah inay soo goobiyaan. Fikradaas markay sidaas u fahmaan intaa waxaa kuxiga sida.

A. Tirooyinka idil ee saddex iyo Afarta god ee kala duwan leh. Tusaale 1238, 403, 845

B. Tirooyinka idil ee leh godadka iskumid ah sida 4444, 5002, 5010

Waa inaad u samaysaa arday hadba sida ku habboon iyagoo koox koox ah ama shaqsi shaqsi sidii ay tirooyinkan isugu barbardhigi lahaayeen horsanaanta tirooyinka idil adigoo kormeeraya kuna dulwareegaye hawlgalka ay kujiraan wixii khalad ahina waa inaad sabuurada ugu faahtaahisaa oo ka saxdaa.

Habkale oo Wax Barista Ardayda

Hawlgalkan waa hawlgal ku xiga isbarbardhiggii iyo horsanaanta ardayda saddexda dugsi kadib lasiin doono.

Waxaad u diyaarisaa baakidho yar yar oo ay ku qoran yihiin tirooyin kala duwan oo leh godad isku mid iyo godad kala duwanba oo saddex iyo afar godba isagu jira baakidha dan tirooyinka ku qoran isugaynayaan isbardhiga iyo horsanaanta tirada iyago saf saf ah ardaydu waa inay usheegaan (tusaan). Kooxahan ardayda koox walba sida ay horsnaanta tirooyinkan ku munjiyaan waa hab kaloo oo ardayda loo fahansiin karo lagana sixi wixii khalad ah.

Xaalada noocan waa in si degan u ilaalisaa edebdarada ama rabshada ardayda ka iman karta.

Ardayda u Baahan Qaababkale oo Kaduwan

Maadaama ay jiraan arday dadaalkooda ama heerka aqoontooda ku kala duwan waxaa muhiim ah in aad ku sisaa casharo gaar ah ardaydani dadaalka kala duwan leh. Ardayda fahan hoose leh waxaad uga billaabaysaa kolba xaaladu siday tahay adigoo uga bilaabaya isbarbardhigga iyo horsanaanta tirooyinka idil ee labada god leh. Si loo gaadhsiiyo ardayda kale ama loo kobciyo fahankooda waa inaad gododka kolba god kale ugu kordhisaa.

Dhinaca kale ardayda fahanka sare leh waxay iyaguna ubaahan yihiin qaab kale oo waxbarasho markaa iyaga inaad ugu joojiso ma'aha gododka tirooyin kan ilaa afar god hadba sida ay ufahansan yihiin adigoo u eegaya kolba god ugu biirisa shan god iyo wixii ka badan ba si. Ay isubarbar dhigaan iyo horsanaanta tirooyinka idil. Waxaa loo baahan yahay inaad usamayso isbarbardhiga iyo horsanaanta tirooyinkan iyadoo laga bilaabiyo laba god, saddex god, afar god, ilaa ay u gudbaan shan god si ay deg deg kor ugu qaadaan fahankooda.

Qiimaynta Joogtada Ah

Waxaad qiimayn joogta ah u adeegsan kartaa si ay u fusho hawlgalada ardayda xiliga waxbarista iyo barashada ardayda su'aalaha ay ardaydu jawaabaha ka bixinayaan iyo indha indhaynta ardayda marwalba aad lasocodnaysid. Iyaadoo habkani socdo si aad hadafka casharka loo hir galiyo ayaad su'aalahan soo socda ardayda sinasiib ah laba arday ama hal arday aad u xulan kadib ayaad waydiinaysaa akhrinta ama qoridda isbarbardhiga iyo horsonanta tirooyinkan.

A. Tirooyinka godadka kala duwan ee 968, 978 iyo 1005

B. Tirooyinka godadka iskumidah ee 6425,6878 iyo 6887

Dhammaan tirooyinka iyadoo aad u qorto horsanaantooda kadib ardydusheegaan midka wayn iyo midka yar iyagoo adeegsanaya astaamaha ah <, >, =, Ardayda kalana waxaa looga baahan yahay inay xaqijiyaan in ardaydani sexsan yihiin.

Jawaabaha Layliska 1.1.J

b.	975, 750, 500	x.	9776, 8978, 7776
t.	3254, 3244, 895	kh.	9950, 9050, 9000
j.	10,000, 7000, 3000		

1.2 DHUFSANAYAASHA 1000, 10,000 IYO 10,000

Ujeedada Gaarka ah

Casharka barashadiisu marku dhamaado dabadeed ardaydu waxay awood u yeelan doonaan:

- Soo saarida dhufsanayaasha 1000 ilaa 10,000

- Soo saarida dhufsanayaasha 10,000 ilaa 100,000

- Soo saarida dhufsanayaa 100,000 ilaa 1,000,000

- Isugaynta laba tiro oo ah dhufsanayaasha 1000 iyo 10,000

- Isugaynta laba tiro oo ah dhufsanayaasha 100,000

- Kalagoynta laba tiro oo ah dhufsanayaasha 1000, iyo 10,000

- Kalagoynta labo tiro oo ah dhufsanayaasha 10,000 iyo 100,000.

- Isbarbardhigidda tirooyinka idil ee ah dhufsanayaasha 1000, 10,000 iyo 100,000

1.2.1 Dhufsanayaasha 1,000

Ku dhiirigali ardayda aqoonta ay uleeyihiin inay sheegaan marka hore ereyga "**Dhufsane**" waxa uu yahay. Marka ay arday badani iskudayaan kadib, taageero sii tijaabadooda. Gabagabadana waxaad u sheegtaa laba tiro oo la isku dhuftay taranta soo baxda ay tahay.

Tusaale $4 \times 10 = 40$

Sidaa awgeed 40 waa dhufsanaha 10

Waliba 40 waa dhufsana 4

Hadda kahor ardaydu waxay aqoon u lahaayeen xisaab ahaan

$1 \times 100 = 100$

$2 \times 100 = 200$

$3 \times 100 = 300$

$4 \times 100 = 400$

$5 \times 100 = 500$

$6 \times 100 = 600$

$7 \times 100 = 700$

$8 \times 100 = 800$

$9 \times 100 = 900$

$10 \times 100 = 1000$

100, 200, 300, 400 ---- 900, 1000 inay yihiin dhufsanayaasha 100 sabuurada intaad ugu qorto dabadeed u sharax oo fahansii.

Intaa waxaa dheer sida ku qoran buugga ardayga faahfaahinta casharka 1.2.1 ugu qor sabuurada oo tus ardayda.

Kadib muddo 5 daqiiqo ah sii si ay buuggooda qoraalka ugu qoraan ugana shaqeeyaan hawlgalka 1.2.a adigoo kormeeraya ama indha indhaynaya ardayda kacaawi wixii khalad ah. Ugu dambayna adigoo usoo koobaya si ay u xasuustaan sabuurada ugu qor 1000, 2000, 3000, 4000, ----- 9000, 10,000 inay yihiin dhufsanayaasha 1000.

1.2.2 Dhufsanayaasha 10,000

Sida ku qoran buugga ardayga dhufsanayaasha 10,000 ee 1.2.2 faahfaahintiisa waa inaad ardayda siisaa fursad ay fikrado isu waydaarsadaan midba midkale wax Iswaydiiyaan.

Sida looga bixiyey faahfaahinta adigoo eegaya waa in ardaydu iyagoo kooxo ah hawlgalka 1.2.B mid mid fasalka kaga jawaabaan markaad eegto jawaabaha ardayda ama hawlgaladooda kadib soo gaabintan soo socota sabuurada ugu qor, si ay u gartaan tirooyinka

10,000, 20,00, 30,00 ------ 90,000, 100,000

Inay yihiin dhufsanayaasha 10,000

Kadib fahansii hal tiro idil inta laqoro dhufsanaheeda in aynan dhammaanayn. Dhufsanayaasha 10,000 na intaa kor kuqoran oo kaliya inaynan ahayna waa in aad u sheegtaa.

Si kooban ----, 100,000;110;

00;120,000, ----- tirooyinkan oo kalena inay yihiin dhufsanayaasha 10,000 u tilmaan.

Si nuxurka casharku ardaydaugu caddaato waa inaad faahfaahinta, su'aalaha iyo jawaabaha isla markaana tusaalooyinka ardayda adeegsataa.

1.2.3 Dhufsanayaasha 100,000

Markaad tusto dhufsanayaasha kuqoran buugga ardayga ee 1.2.3 dhufsanayaasha 100,000 kadib, waydii inay kabixiyaan tusaale lamid kuwan oo kale iyo tusaalooyin kale oo xaggaaga kayimid aad sii kadib, adigoo wakhti siinaya inaad ku saxdo fasalka dhexdiisa iyagoo hawlgalka 1.2.C. fasal ka kaga shaqeeyaan.

Xiisadan waxaa laagu soo koobayaa

100, 000, 200,000, 300,00 ------, 900,000, 1,000,000

Tirooyinkan inay yiliin dhufsanayaasha 100,000 ugu qor sabuurada.

Ardayda ilaa hadda waxay barteen si ay u barbartaan layliska 1.2.A ee shaqo guri aad ku siisay dabadeed ka soo shaqeeyeen, adiguna aad u saxdaa adigoo siinaya dhiiri galin sida ay uga soo jawaabeen.

Qaababka Kala Duwan EE Waxbarista

Sida kor kuqoran dhufsanayaasha 1000, 10,000, iyo 100,000 oo ku diyaarsan shax tus qaababka ay yihiin dhufsanayaashu.

Adigoo adeegsanaya tusaalooyin laxidhiidha casharka agagaarka guryaha (xaafadaha) ardayda waxyaabo tusaalooyin loo adeegsankaro siinaya iyagana ku caawiso inay fikrado ka dhiibtaan si casharku xiiso ugu yeesho ardayda waad samayn kartaa.

Tusaale ahaan – 100 ka riyaal imisa 10^{aad} ayaaku kujira?

Qofka mushaarkiisu yahay 1000. 2bilood, 3, 4, 5, --- 10 imisaa ayuu qaadanayaa.

Qaabka wax baris-barashada marka lagu salleeyo habab kala duwan sida su'aalo iyo jawabo, hawlgallo iyo qaabab kale xogta laga helaa inay tahay qaab kamid ah qiimaynta joogtada ah. Intaa waxaa dheer si loo ogaado ujeedooyinka cashirka in ay hirgaleen iyo in aanay hir galin waa inaad su'aalo ku saabsan ujeedada casharka ugudbisaa ardayda dabadeed jawaabaha ardayda ayaa habboon inaad ku qiimaysaa.

Sida su'aalahan soo socda oo kale.

1.　　　Qor hal hal tusaale oo ka mid ah dhufsanayaasha 1000, 10,000 iyo 100,000

2.　　　Qor dhufsanayaasha udhexeeya 70,000 ilaa 100,000 ee ah dhufsanayaasha 10,000

3.　　　Qor dhufsanayaasha 1000 ilaa 10,000 ee ah dhufsanayaasha 10000.

Jawaabaha Hawlgalada Iyo Laylisyada

Hawlgalka 1.2.B

2. b. $4 \times 1000 = 4000$ k. $7 \times 1000 = 7000$ r. $10 \times 1000 = 10{,}000$

   t. $5 \times 1000 = 5000$ kh. $8 \times 1000 = 8000$

   j. $6 \times 1000 = 6000$ d. $9 \times 1000 = 9000$

Hawlgalka 1.2.T

   b. $4 \times 10{,}000 = 40{,}000$ x. $7 \times 10{,}000 = 70{,}000$

   t. $5 \times 10{,}000 = 50{,}000$ kh. $8 \times 10{,}000 = 80{,}000$

   $6 \times 10{,}000 = 60{,}000$ d. $9 \times 10{,}000 = 90{,}000$

Jawaabaha shaqo fasal 1.2

$1 \times 100{,}000 = 100{,}000$ $6 \times 100{,}000 = 600{,}000$

$2 \times 100{,}000 = 200{,}000$ $7 \times 100{,}000 = 700{,}000$

$3 \times 100{,}000 = 300{,}000$ $8 \times 100{,}000 = 800{,}000$

$4 \times 100{,}000 = 400{,}000$ $9 \times 100{,}000 = 900{,}000$

$5 \times 100{,}000 = 500{,}000$ $10 \times 10{,}000 = 100{,}000$

Jawaabaha Layliska 1.2.B

1.

Dhufsanayaa sha 1000	Dufsanayaa sha 10,000	Dhufsanayaa sha 100,000
1000	10,000	100,000
2000	20,000	200,000
3000	30,000	300,000
4000	40,000	400,000
5000	50,000	500,000
6000	60,000	600,000
7000	70,000	700,000
8000	80,000	800,000
9000	90,000	900,000
10,000	100,000	1,000,000

2. b. 5000 bir   t. 10,000 litir   j. 40,000 kuntaal

   x. 60,000 mitir   kh. 300,000 bir

1.2.4 Isugaynta iyo kala qoynta Dhufsanayaasha 1000, 10,000, iyo 100,000

B.　Isugeynta

Su'aal Sababta "Isugaynta" aan adeegsano? Iyo

Ereyga "Isugayn" waxa uu yahay?

Nuxurka isugaynta fikrado laxidhiidha waa in aad isticmaasha si aad ardayda uga hesho tusaalooyin fikrada kala duwan iyo garashadooda isugaynta.

"Isugayn" inay tahay xisaab-fal ah laba tiro marka la isu daro wadarta kasoo baxda. Ama tirooyin kala duwan marka meel la iskukeeno (daro) xisaabfal loo adeegsado in isku darida tirooyinkaas. intaa markay ardaydu gartaan kadib si aad u fahansiiso dhufsanayaasha 1000; 10,000 iyo 100,000 isugayntoodu ka duwanayn sida kor kuxusan ayaad sabuurada ugu qoraysaa adigoo u sharaxaya tusaalayaasha ku qoran buugga ardayga ee tusaale 4, tusaale 5, tusaale 6. Haddii ay tusaalayaashaasi ku filnaan waydo waxaa habboon ama laga maarmaan ah in loo sharaxo tusaalooyin kale oo la xidhiidha ilaa ay ka fahmayaan.

Sida tusaale 4 lagu siiyey dhufsanayaasha 1000 (1 kun) isugaynta xisaab-falkooda.

$1000 + 2000 = 3000$ sababtoo ah adigoo tusaya shaxda qiima rugeed godadka ah ee ku qoran ayaad u sharaxaysaa in qiimaha godadka isku mid ah la isugaynayo sidan.

$1 + 2 = 3$

$0 + 0 = 0$

$0 + 0 = 0$

$0 + 0 = 0$

Tusaale 5 waa isugaynta dhufsanayaasha 10,000 (toban kunaadka)

$10,000 + 30,000 = 40,000$ adigoo tusaya qiima-rugeedka godadka sida shaxda ku qoran usoo gaabi sidan $1 + 3 = 4$ tirooyinka godkakale maadaama ay eber yihiin isugayntooduna eber inay fahan sii.

Sida tusaale 6 ku qorana waa isugaynta dhufsanayaasha toban kunaadka iyo boqolkunaadka.

$700,000 + 70,000 = 770,000$, sababtoo ah adigoo tusaya sida shaxda ka muuqata ugu soo gaabi

$7 + 0 = 7$

$0 + 7 = 7$　　Isugaynta godadka kalena waa eber.

Kadib marka tusaalooyin kaas ardayda aad tustay kadib sii ardayda shaqooyinkale oo dheeraad ah.

Ugu dambayna buugga ardayga bogga ＿ layliska 1.2.B su'aalaha ku qoran qaarka mid ah sida a: b: c fasalka gudiisa ku waydii ardayda inay ku dhawaaqaan jawabtooda. Layliska 1.2c su'aalaha ku qoran a: b: c: uga dhig shaqo fasal adigoo kadib jawaabtoodana usaxaya.

Su'aalaha kale ee hadhsan ardayda u sii shaqo guri kadib xiisada ku xigta u sax adigoo kuna dhiirigalinaya.

Si qiimaynta joogtada ah ugu samayso ardayda adigoo raadinaya ujeedooyinka casharka inay hirgashay ayaad su'aalaha soo socda sabuurada ugu qoraysaa si ay uga jawaabaan.

Su'aalahan ayaa loo diyaariyey

Isugee tirooyinkan

1. 20,000 + 6,000   5. 300,000 + 9,000

2. 30,000 + 6,000   6. 70,000 + 900,000

3. 200,000 + 12,000   7. 800,000 + 99,000

4. 90,000 + 8,000

Jawaabaha Layliska 1.2 t

1. b. 1500   t.   8000   j.   50,000   x.   90,000

    kh.   450,000   d.   604,000

2. b.   1000   t.   6000   j.   50,000   x.   10,000

    Kh. 100,000   d.   200,000

T.   Kalagoynta

Ereyga "**kalagoynta**" muxuu yahay? Maxaan u adeegsanaa? Fikirka ay uleeyihiin kalagoynta iyo sababta aan u adeegsano ku ardayda inay wax ka sheegaan.

"**kalagoyn**" waa xisaab fal aan u adeegsano marka tiro idil laga jarayo tiro idil oo ka yar inay tahay markay ogaadaan kadib, kala goynta dhufsanayaasha 1000, 10,000 iyo 100,000 inaynan ahayn si ka gadisanfahansi oo tus. Sida buugga ardayga ku qoran tusaalayaasha 7 iyo 8 faahfaahintooda sabuurada ugaga shaqee. Tusaalooyinka hadday ku filaan waydo tusaaleyaal dheeraad ah sii.

Kalago Kuwan Soo Socda

1. 20,000 – 10,000   5. 10,000 – 2,000

2. 30,000 – 50,000

3. 300,000 – 100,000

4. 300,000 – 70,000

Dhiiri galin ku sii iskaashiga iyo doodda ay ku sameeyeen hawlgalka kala goynta ee fasalka gudihiisa.

F.G:- maadaama ay ardaydu fahankoodu kala duwan yahay waa in ardayda hadba qaabka ay ufahmayaan ugu kala adeegsataa.

Adigoo wanaajinaya, jeclaysiinaya islamarkana xiiso galinaya ardayda waa inaad kuwo fahankoodu liito su'aalo fudud oo ay ka shaqayn karaan siisaa, halka kuwa kalena aad ka siiso su'aalo u dhigma maadaama uu fahankoodu sarreyo.

Tusaale:- Ardayda fahankoodu degdega yahay tiro godad badan sii dhinaca kale ardayda liidata sii tiro godkeedu yar yahay.

Tusaalaha 7:- sida ku qoran

$3000 - 1000 = 2000$ sababtoo ah $3 - 1 = 2$, tus ardayda qiima-ruggeedka shaxda ku qoran.

Tusaalaha 8:- sida ku qoran

$500,000 - 100,000 = 400,000$ sababtoo ah $5 - 1 = 4$ fahansii ardayda qiima-ruggeedka kuqoran shaxda (Jaantuska).

Qaababka Kale Waxbarista

Markaynu taxayno iyo waliba markaynu kalagoynayno tiroonka 1000, 10,000 iyo 100,000 waxaad adeegsan kartaa abaakas.

a) Tusaale 6 sida ku xusan tusaahaha isugaynta ayaad tusi kartaa

$700,000 + 70,000 = $ _____

700,000   70,000

b) Tusaale 8 sida ku xusan tusaalaha kalagoynta sidan hoosku qoran ayaad u tusi kartaa
$500,000 - 100,000 = $ _____

500,000   100,000   400,000

Abaakaska waxa uu yahay iyo waxa laga sameeynkaro ayaa shaqofasal 1.1. faahfaahin fiican lagu siiyey.

Sida Kutaalla A Fallaadha

Abaakaska labaad godadka 10,000 goobooyinka ku jira intuu ka saaray ayuu abaakaska koowaad ee godka 10,000 ayuu ku daray. Labada abaakas goobooyinka ka muuqda waxaa lagu arki karaa abaakaska saddexaad.

Sidaa daraadeed abaakaska labaad waxaad si fiican ugu arkaysaa isugaynta dhufsanayaasha 70,000 + 700,000 inuu jyahay 770,000.

Fallaadha b Sida Ka Muuqata

Abaakasta koowaad 500,000 ayaa ka muuqata.

Abaakasta labaad 100,000 ayaa ka muuqata.

Abaakaska labaad godka 100,000 hal wareeg ayaad laga qaadayaa. Marka hal wareeg uga qaado 4ta wareeg ee soo hadha waxay caddaynay saa 400,000.

Sidaa daraadeed 500,000 – 100,000 = 400,000 maadaama ay tahay abaasta saddexaad aad ayey u muuqataa.

Ardayda u baahan qaababka kala kuwan ee waxbarista.

Ardayda inkastoo heerarkooda ay kala duwan yihiin waxay u baahan yihiin iyadoo heerkooda lagu sallaynayo loogu fahansiiyo godadka tirooyinka. Ardayda fahanka yar godod yar, kuwa kalena godadka loo biiriyo

Buugga ardayga bogga 8 sida kuxusan layliska 1.2T markay kaga soo shaqeeyaan gurigooda kadib dhiirigalin ku habboon waa in aad siisaa.

Kuwa degdeg uu yahay fahankoodu tirooyin ka dhufsanayaasha 10000, 10,000 isugaynta iyo kalagoyntaba, kuwa liitana godadka loo yareeyo ayaad su'aalo ka waydiinaysaa. Su'aalahan soo socdana fasalka gudihiisa ku sii si ay kuugu noqoto qiimayn Joogta ah.

Qiimayn Joogta

1. Qor ama sheeg laba tiro ee dhufsanayaasha 10,000 ah wadartoodu tahay 90,000

2. Raadi isugaynta laba tiro ee dhufsanayaasha 1000,000 wadartoodu tahay 800,000.

3. Raadi laba tiro oo dhufsanayaasha 10,000 faraqoodu yahay 20,000

4. Raadi qiimaha x

    a. 700,000 + x = 900,000

    b. 700,000 – x = 400,000

    c. 900,000 – 700,000 = x

    d. 700,000 – 400,000 = x

1.2.5 Isbarbardhigidda Dhufsanayaasha 1000, 10,000 iyo 100,000

Casharka ku billow adigoo waydiinaya **isbarbardhigidda"** waydiinaya ardaydu siday ugu soo barteen hadda ka hor aqoontooda xisaabeed tirooyinka idil ee ilaa 10,000 way isbarbardhigi karaan. Si ay u yeeshaan aqoon buuxda, waxyaalaha ay deegaan kooda ku garanayaan dhererka, culayska, ballaca, da'da, wakhtiga iyo qiimaha alaabaha. Aad ayey u haboon tahay in aad ardayda ku dhiirigalisaa, kuna baraarujisaa inay shuruudahaas isticmaalaan si ay isbarbardhigan.

Laba arday intaad sabuurada soo joojiso midkeebaa dheer? Tirada gabdhaha iyo wiilasha ardayda ah ee fasalka kuwee badan?

Adigoo sheegaya laba baaskiil qiimahooda, baaskiil kee qaali ah? Midkee raqiis ah? Barkado adigoo sheegaya barkad walba inta mugee ku jira, barkadee biyo badan qaada? Adigoo su'aalaha noocan ah adeegsanaya markay ujeedada fahmaan kadib inaynan kuduwanayn isbarbardhigga 1000, 10,000 iyo 100,000 usharax inay islamarkaana fududahay.

Hawlgalka fasalka 1.2D u sii ardayda shaqo fasal markay ardaydu ka shaqaynayaan dul wareeg oo indha indhee adigoo ka caawi naya wixii khalad ah.

Imika sida u muuqata ardayda waa isbarbardhiga dhufsanayaasha 10,ka kun. Mararka dambe tirooyinka idil oo dhan mid walba isbarbardhiggooda ayey baran doonaan u tilmaan. Isbarbardhigga tirooyinka idil ee dhufsaanyaasha qudha aanay ahayn.

Qiimayn Joogta Ah

1.　　Keebaa wayn10,000 iyo 20,000?

2.　　Keebaa wayn 300,000 iyo 90,000?

3.　　Keebaa yar 80,000 iyo 8,000? Su'aalahan jawaabohooda adiga waa inay kaasoo baxaan.

Jawaabaha Shaqo Fasal 1.2J

1.　b.　2,000 bir　　　t.　5,000 bir　　　J. maktabadda ay yaallaan 70,000 buug.

　　x.　100,000 shacab

　　kh.　1,000,000 mitir wabiga ah

1.3 TIROOYINKA IDIL ILAA 1,000,000

Casharkan marka uu dhammaado ardaydu waxay awood uyeelan doonaan.

- Raadinta tirooyinka idil ee ah ilaa 5 astiro kuwo 1000, 10,000 iyo 100,000 dhufsanayaasha ah isugayntooda ilaa tirooyinka idil ee ah 1,000,000

- Akhrinta tirooyinka idil ilaa 1,000,000

- Qoridda tirooyinka idil ilaa1,000,000

Qaabka Ugu Billaabista

Casharkii hore ardaydu waxay kusoo qaateen 9barteen) 1.2.4 isugaynta dhufsanayaasha 10000, 10,000 iyo 100,000.

Intaa waxaa dheer tirooyinka tirsiimo tirintooda ee tobnaadka, boqolaadka, kunaadka, tobankunaadka, ilaa boqol kunaadka. Casharkan waxay ku baranayaan tirooyinka idil ee ilaa 1,00,000 waa inaad markaa tustaa habka ay ku garan lahaayeen tirooyinka idil ee ilaa 1,000,000.

Tusaale ahaan:- Haddii larabo in la ogaado tirooyinka idil ee udhaxeeya 4000 iyo 5000 waa tirooyinka ku jira 1 ilaa 999 oo loo geeyay 4000. Marka laballaadhiyana waa.

4000

$4000 + 1 = 4001$

$4000 + 2 = 4002$

$4000 + 3 = 4003$

$4000 + 998 = 4998$

$4000 + 999 = 4999$

Tirooyinka idil ee udhexeeya 4000 ilaa 5000 iyagoo utaxan sidan ayey ugaran karaan in 4000 ilaa 5000 tirooyinka u dhexeeya 999 tahay.

1.3.1 Isugaynta Tirooyinka Idil Iyo Dhufsanayaasha 1000, 10,000 ama 100,000 ee tirooyinka idil

Ku caawi ardayda hadda ka hor casharadii ay soo qaateen una xasuustaan si ay u qeexaan.

Shaqo fasalka 1.3A wakhti u sii si ay buuggooda qoraalka ah ugaga shaqeeyaan iyagoo ah kooxo ama shaqsi Markay ka shaqeeyaan kedib waad u gudbishaqsi. Markay ka shaqeeyaan kadib qaad u gudbikartaa tusaalaha 9. Balse hadday ka shaqayn waayaan habka looga shaqaynayo faahfaahin ka sii. Sida buugga ardayga kuqoran tusaale 9 siday ukala horreeyaan su'aalo afka kawaydii adigoo sabuuradana kaga shaqaynaya kuna dhiiri gali.

Marka laga shaqeeyo kadib layliska 1.3.A a, b, c iyo d sabuurada ugu qor shaqo fasal ahaan mid mid ha uga shaqeeyaan. Habkan waxay abuuraysaa xiisaha iyo tartansiinta ardayda inay awood u yeeshaan casharka waa inaad wargalisaa kuna adkaysaa ardayda in tirooyinka si sax ah inay u qoraan giimo-rugeeda gododka.

Kadib marka ay ardaydu kaga shaqeeyaan sabuurada islamarkaana aad siiso jawaabo iyo dhiirigalin. Su'aalaha hadhaa ilaa su'aasha 3^{aad} ee layliska 1.3.A dhammaantood shaqo guri u sii. Kadib markay kasoo shaqeeyaan usax si ay khaladaadkooda u fahmaan.

Qaababka Kale ee Waxbarista

Sida 1.2 Abaakasta loo adeegsaday waad isticmaali kartaa

Tusaale $1000 + 1325 = $ _____

$1000 + 1325 = 2325$

Kuwa kalena xiisadan sida tusaalaha hore oo kale abaakas waad u adeegsan kartaa si qaabkale oo waxbaris barasho ahaan.

Qiimayn Joogta Ah

Su'aalaha afka laga waydiinaya fasalka gudihiisa ah ee mararka kala duwan, hawlgallada fasalka, iyo laylisyadaba waxay yihiin kuwa xoojinaya ujeedooyinka casharka ahna hadafka uu leeyahay casharka in ay hirgaleen sababaha lagu garan karo sida.

Su'aalahan soo socdana waydii ardayda

1. 9 + 10000
2. 42 + 1000
3. 342 + 1000
4. 3745 + 10000
5. 13745 + 1000

Jawaabaha ka soo baxa tallabo ayaad qaadan kartaa

Hawlgalka 1.3 A Jawaabahooda

1. a)   2,100   b) 3,201   c) 7,052   d) 9,325   e.   10,002   f) 10,909

2.

Tiro idil	Dhufsanaha 1000	Wadar
324	7,000	7,324
4,121	3,000	7,121
23,103	4,000	17,103
31,415	8,000	39,415
77,777	10,000	87,777

3.   a.   3,200 qof   b.   8500 buug

B.   Isugaynta Tirooyinka Idil Iyo Dhufsanayaasha 10,000

Ku hawlgali shaqada fasal ee 1.3B inay fasalka gudihiisa iyagoo jawaabta kuqoraya buuggooda qoraalka. Kadib kuna dhawaaqaan. Ardayda horay uga shaqaysa layliska 11.3.B ee 1ᵃᵃᵈ a, b, c, shaqo fasal oo dheeraad ah sii. Ardayda markay ka shaqeeyaan jawaabaha kuhaboon sii. Intaa kadib **tusaale 10** si taxana ah ardayda odhaah ahaan u waydii adigoo faahfaahinaya ugu dambayna qaybaha hadhay layliska 1.3B su'aalahooda usii shaqo guri adigoo ilaalinaya inay ka shaqeeyeen iyo inkale si aad u garato dabadeedna tallabooyinka ku habboona inaad adeegsato ayaa loo baabaahan yahay. Tusaalahan inaad fahansiiso waxaad doorbidaysaa adeegsiga abaakas.

Qiimayn Joogto Ah

Su'aalahan soo socda ardayda ku

tijaabi isugee 4567 + 80,000

Jawaabaha Shaqo Fasal 1.3 B

11,522 litir

Jawaabaha Layliska 1.3B

1.	b.	9325	x.	54016	r.	232,223
	t.	10,002	kh.	11,5649	s.	455,678
	j.	10,909	d.	85,310	sh.	704, 537

T.   Isguaynta Tirooyinka Idil Iyo Dhufsanayaasha 100,000

Si aad casharka ubillowdo shaqo fasal usii 1.3C iyagoo buuggooda kaga shaqaynaya haddana tusaale ll sida ku qoran sida ay iskugu xigaan ardaydu u waydii adigoo faahfaahina siinaya.

Waa inaad usheegtaa tirooyinka inloo kala horraysiiyo qiima-rugeed gododkooda.

Sida tusaalahan – sidii mararkii hore abaakas waad adeegsan kartaa.

Layliska 1.3C usii ardayda shaqo guri. Dood iyo iskaashi ku hawlgali markay kaso jawaabaana, usax.

Qiimayn Joogta Ah

Su'aashan ookale su'aalo lamid ah ku tijaabi ardayda isugee 37432 + 500,000

Jawaabta Shaqo Fasal 1.3C

Qimaha cusub waa 102, 550 bir

1.3.2 Akhrinta Iyo Qoridda Tirooyinka Idil Ilaa 1,000

Nakhtiin adigoo ku samaynaya ayaad ardayda ka ogaanaysaa akhrinta iyo qoridda tirooyinka idil ilaa 10,000. Nakhtiinka kuxusan buugga ardayga bogga tusaale 12 waa nakhtiinkaas mid kutusaysa Tirooyinka idil ilaa 10,000 oo dhan waxay yihiin dhufsanayaasha wadartooda adigoo tusaya ayaad 10-ley u isticmaali kartaa in ay ardaydu xasuusan karaan, tusaale 12 sida ku qoran, u faahfaahi oo dhiirigali adigoo waydiinaya (su'aalaya) si ay uga jawaaban.

Sidaa daraadeed:- 2345 = 2000 + 3000 + 50 + 4

Sida sawirka ka muuqata 2000, 3000, 50, 4 waxa u taagan u sharax oo u faahfaahi.

Sidaa awgeed ku dhawaaqista tiradan:- laba kun saddex boqol konton iyo afar ina loo akhriyo usheeg si ay xasuustooda u cusboonaysiiyaan.

Waxaana haboon sida ku cad tusaalaha: 2345 qaababkan kala duwan in lagu tilmaamo, ka caawi si ay ugu fiirsadaan

- 2345 → Tiro   Astiro ahaan

- $2000 + 300 + 50 + 4 →$ astaanta fidsan

- Laba kun saddex boqol konton iyo afar → weedh-xisaabeed ama marka la akhrinayo

Tusaalahan siaad u faahfaahiso abaakas ayaad isticmaali kartaa.

Sida kor tusaale 12 loo faahfaahiyey oo kale ayaad tusaale 13 iyo 14 qaabab kale ugu fahan sii kartaa ardayda.

Ardaydu markay saddexda tusaaleba fahmaan kadib su'aalahan soo socda adigoo su'aalaya ilaa 1,000,000 u tiro idil ah si aad u hubiso in ay akhrinkaraan iyo waliba qori karaan.

Qiimayn Joogta Ah

1. Su'aalahan soo socda ee ah tirooyinka idil waa in ardaydu codkoodu iyagoo kor u qaadaya akhriyaan kadibna ku qoraan weedh-xisaabeed

    a. 2836 d. 546,002 g. 100,113

    b. 54,437   e. 501,012 h. 112,001

    c. 89,823   f. 987,632 i. 174,599

2. Kuwan soo socda u su'aal inay ku qoraan astiro ahaan iyo godad ahaan

    a. Shan kun toddoba boqol sagaashan iyo afar

    b. Laba iyo lixdan kun toddoba boqol siddeetan iyo laba

    c. Saddex boqol oo kun afar boqol iyo hal

    d. Saddex boqol laba iyo todobaatan kun iyo hal

    e. Boqolkun afartan iyo lix

    f. Siddeed boqol iyo siddeetan kun siddeed boqol sidded iyo siddeetan

    g. Laba boqoloo kun shan boqol iyo lix

    h. Boqol kun afar iyo toban

Kadib markaad hubiso in ardaydu fasalka dhexdiisa hakaga shaqeeyeen sii laylisyo dheeraad ah. Kadib ayaad layliska .13D usiinaysaa shaqo guri. Xaqiiji inay ka soo shaqeeyeen layliskan dabadeed kasax wixii khalad ah.

1.4 QIIMA – RUGGEEDKA TIROOYINKA 6-DA GOD AH

Ujeedooyinka Gaarka Ah

Casharkan marka uu dhammaado ardaydu waxay awood u yeelan doonaan:-

Soo saarida qiimaha qiima-ruggeedka tirooyinka idil ee 6-da god ah

Qaabka Ugu Bilaabista

Ilaa hadda waxa ay barteen dabeecadaha tirooyinka idil adigoo usoo na htiiminaya si shaxda qiimaha qiimo-ruggedka tirooyinka idil loogu muujiyo tahay ee cashar cusub oo nooc kale kaduwan inaan u ahayn usheeg ka dibna u billow.

Sidan Ugu Faahfaahi Ardayda

Haddii aan soo qaadano hal tiro idil leh afar astiro tusaale ahaan 8742, in marka la tilmaamayo astiro kasta siday ukala horreeyaan loo dhigayo u sharax.

Tirada dusheeda markaan ka billow dhina ca bidix ilaa midig.

Astiro 2 waxay ku jirtaa godka koowaadka

Astiro 4 waxay kujirtaa godka tobnaadka

Astiro 7 waxay jirtaa godka boqolaadka

Astiro 8 waxay ku jirtaa godka kunnaadka

Subabtoo ah

Inay tahay adigoo tusaya ardayda waxay garayeen ee kale isku day sidii ay ku xasuusuun laheeyeen

Iyadoo ah tirooyin ka idil 8742 gudeheeda

2 qiimaha qiima-ruggeedka $2 \times 1 = 2$

4 qiimaha qiima-ruggeedka $4 \times 10 = 700$

8 qiimaha qiima-rugeedka $8 \times 1000 = 8000$

Xasuusi in ay soo cusbuunay siiyaan barashadii hore.

Tiradan qiimaha qiima-ruggeedka marka aan faahfaahiyo sidan ayu u'eg yahay.

Godka boqol-kunaadka	Godka Tobanku naadka	Godka kunaad ka	Godka boqolaadka	Godka tobnaadka	Godka koowaadka
		8	7	4	2

Maadaama oo ay tahay qiimaha qiima-rugeedka godadka waa in ay ardaydu la wargaliyaa inay ku xidhantahay in god ee ay leeyiniin.

Buugga ardayga bogga 12 tusaale 2 waxa ku qoran tirooyinka idil ee 4-ta god leh oo siyaabo kala duwan ugu qoran ugu dambayn fahansii ardayda shaxda qiimaha qiima-ruggedka ee tirooyinka idil.

Si dheeraad ah ardayduna waa inay sheegaan tusaaleyaal kala duwan, iyagoo ku muujinaya shaxda qiima-rugeedka qiimaha tirooyinka.

Qaababka Waxbarista

Waxaad u adeegsan kartaa abaakas si aad u faah faahiso qiimaha qiima-ruggeedka is lamarkaana tus.

Godka boqolka Godka kunka Godka tobanka Godka kowaad

Buugga ardayga bogga 11 iyo 12 tusaale 1 iyo 2 ardayda tus adigoo adeegsanaya abaakas.

Ardayda fahansii qiimaha qiima ruggeedka doorka uu ku leeyahay xisaab fallada.

Tusaale   2374 + 121

Marka joog loogaga shaqaynayo

2374	2374	2374	2374
+121	+121	+121	+121

Haddii ilaa imika ardaydu sifiican ay u fahmeen buugga ardayga bogga 12 layliska 1.4A. shaqo guri usii. Xiisada kale markaad xaqiijiso inay kasoo shaqeeyeen iyo inkale wixii khalad iyo saxba ah ukala cadee.

Qiimayn Joogta Ah

Tirooyinka idil ee leh 6-da – 1, 2, 3, 4, 5, 6 sabuurada ugu qor, ku amar ardayda inay ku qoran shaxda qiimaha qiima-ruggeedka kadib adigoo kaduulaya shaqada ardayda tallaabo ku habboon qaad markaa.

Jawaabaha Layliska 1.4A

1.

Tiro idil	Boqol kunaad ka	Toban kunaad ka	Kunaad ka	Boqolaa dka	Tobnaadka	Koowaadka
3,582			3	5	8	2
54,629		5	4	6	2	9
87,006		8	7	0	0	6
850,345	8	5	0	3	4	5
995,321	9	9	5	3	2	1
890,405	8	9	0	4	0	5

2.　　b.　50　　　　t.　　600　　　j.　　30,000　　x.　　90　　kh.　5000

　　　d.　0　　　　r.　　4　　　　s.　　90,000　　sh.　90,000

1.5   ISBARBAR DHIGIDDA IYO HORSANAANTA TIROOYINKA IDIL ILAA 1,000,000

Waqtiga loo qoondeeyay (5xiisadood)

Ujeedooyin gaar ah

Casharkan kadib ardaydu

- *Waxay isbarbardhigi kara yaan tirooyinka idil ilaa 1000,000*

- *TIrooyinka idil ee ilaa 1,000,000 ayay horsanaan u qora yaan inta ay ka bilaabaan ta yar ilaa taweyn ama inta ay ka bilaabaan ta weyn ilaa ta yar.*

Erayada muhiimka ah:- Isbarbar dhigid, Horsanaan u qoris.

Hordhac

